

Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 22^{aad}

10 Aug -13 Oct 2013

December 2013

Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 22^{aad}

Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo:- Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 22^{aad}

Mudanayaal

Si aad hawlaha u qorshaysan kal-fadhiga 23^{aad} ee Golaha Wakiilada u dardar galino una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 22^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan.

Ajandaha Kal-fadhiga 22^{aad} ee Golaha Wakiilada.

17/08/2013

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogogaal u noqoshada Xaalada Dalka JSL
3. Arrimaha Golaha
4. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal

No.	Magaca Xeerka	Marxalada marayo	aa u	Cida Gacanta ku haysa
1.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku ku-xigeenka iyo Baarlamaanka	Madaxweynaha	ka	Gole Weynaha Ansixin
2.	Waxkabadalka Xeerka Qareenada	Madaxweynaha	ka	Gole Weynaha Ansixin
3.	Xeerka Booliska	Akhriska	3aad	Gole Weynaha
4.	Xeerka ka Gacansiga Hawlaha Bangiyada JSL	Akhriska	1aad	Gudida dhaqaalaha
5.	Xeerka Shidaalka Iyo Macadanta	Akhriska	1aad	Gudida Khayrada Dabiciga ah
6.	Xeerka Caasimada	Mooshin Mudanayaal		Gudida Arrimaha Gudaha
7.	Xeerka Horumarinta Wadooyinka	Akhriska	1aad	Gudida Ariimaha Bulshada
8.	Xeerka Xabsiyada	Akhriska	1aad	Gudida Shurucda
9.	Xeerka Hay'adda HIV	Akhriska	1aad	Gudida Arrimaha Bulshada
10.	Miisaaniyadda 2014	Ku talo gal		Wasaaradda Maaliyadda

5. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
6. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
7. Xeeraka ka soo noqda Golaha Guurtida
- 8 Iyo Wixii kale ee soo kordha

Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 22^{aad}

1. Kal-fadhigii 22^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	22 ^{aad}	10/08/2012	13/10/2013

Kal-fadhigan oo Golahu qabtey hawlo oo muhiim ah sida ansixintii Masuuliyiin Qaran oo aad u tiro badan, Ansixinta 3 Xeer iyo Ansixinta Odooroska Miisaaniyada 2014, sidoo kale wuxuu Goluhu kal-fadhigan yeeshay Fadhi Xidhan oo Shir-gudoonka iyo Mudanayaashu kaga wada hadleen Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Golaha Wakiilada.

Sidaa darted, Mudanayaan waxaan halkan idiinku soo Gudbinaynaa dhamaan Waxqabadkii Gole weynaha, Shir-gudoonka iyo Gudiyada sidan soo socota.

2. Xeerarka Goluhu Ansixiyey:-

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
1.	Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddoyinka	24/09/2013	Madaxweyne
2.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Madaxweynuhu soo celiyay	02/09/2013	Madaxweynaha
3.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golyaasha Barlamaanka Madaxweynuhu soo celiyay.	02/09/2013	Madaxweynaha
3.	Xeerka Booliiska JSL	05/10/2013	Golaha Guurtida



Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 22^{aad}

3. Masuuliyiinta Goluhu Qaran ee Goluhu Ansixiyey:-

No.	<u>Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey</u>	<u>Xilka Masuulka</u>	<u>T/la ansixiyey</u>
1.	Md. Maxamed Biixi Yoonis	Wasiirka Arrimaha Dibada	31/08/2013
2.	Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)	Wasiirka Warfaafinta iyo Wacyigalinta	31/08/2013
3.	Md. Aadan Axmed Warsame	Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology	31/08/2013
4.	Md. Maxamed Jaamac Abgaal	Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta	31/08/2013
5.	Md. Axmed Cabdi Kaahin	Wasiirka Wasaarada Dib-u dejinta	31/08/2013
6.	Md. Maxamed Muuse Abees	Wasiiru-dawlaha Wasaarada Madaxtooyada	31/08/2013
7.	Md. Bashiir Cabdi Xariir	Wasiir Ku-xigeenka W. Ganacsiga iyo Maalgashiga	31/08/2013
8.	Md. Xasan Daahir Dhimbiil	Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Qorsheynta	31/08/2013
9.	Md. Cabdi Daahir Camuud	Wasiir Ku-xigeenka Gaashaandhiga	01/09/2013
10.	Md. Shugri Xaaji Ismaacill Baandare	Wasiirka Deegaanka iyo reer Miyiga	01/09/2013
11.	Md. Xuseen Axmed Cabdulle	Wasiirka Biyaha	01/09/2013
12.	Md. Cali Jaamac Faarax	Wasiirka Kaluumaysiga	01/09/2013
13.	Md. C/raxmaan Jaamac Cabdulle	Wasiiru Dawlaha Xanaanada Xoolaha	01/09/2013
14.	Md. Cali Maxamed Ahmed (Cali Sandulle)	Wasiir dawlaha iyo Hormarinta Gobolada Bari	01/09/2013
15.	Md. Shukri Xariir Ismaacil	Wasiir K/xigeenka Wasarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada	01/09/2013
16.	Md. Aadan Ibraahim Maxamed	Wasiir K/xigeenka Beeraha	01/09/2013

17. Md. C/waaxid C/qaadir C/raxmaan	Wasiir K/xigeenka Wasaarada Warfaafinta	01/09/2013
18. Md. Cali Maxamed Warancade	Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada	07/09/2013
19. Md. Axmed Nuur Faahiye	Wasiiru Dawlaha Waxbarashada	07/09/2013

5. Ansixintii Odooroska Miisaaniyada Qaranka ee 2104ka.

Wuxuu Goluhu Ansixiyay intii lagu jiray Kal-fadhigii 22^{aad} taariikhdu markay ahayd 13/10/2013 Odooroska Miisaaniyada Qaranka 2014ka, Miisaaniyada sanadkan waxay dhan tahay qadar dhan 1,276,033,716000 SLSHoo u dhiganta dollar ahaan **\$212,672,286** taas oo u kula baxda sidan:-

- Miisaaniyaadda dawladda dhexe oo dhan **912,000,000,000** una diganta **\$152,000,000**.
- Miisaaniyaada Hayaddaha Madaxa Banan (Banka, Dekkadda, Wakaladda Bihyaha Madbacadda Iyo Korontadda IWM.) oo **dhan 153,197070,793 SLSH** una dhiganta **\$25,532846**.
- Dawlahada hoose oo dhan **129,836,638,953** una dhiganta **21,639,440**.
- Deeq ay balan inoogu qaadeen **Denmark Iyo Brittan 81,000,000,000SLSH** una dhiganta \$ **13,500,000**.

Waxa Goluhu gaadhay go'amada iyo talooyinka soo socda oo ka mid noqon go,aanka ansixinta miisaaniyadda qaranka ee 2014.

Go'aamo

1. In ha'yadaha ku jira miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2014 ee aan Golaha Wakiilada loo soo gudbin xeerarkii lagu aasaasay loogu soo gudbiyo Golaha sagaashan (90) cisho gudahood, Hey.adda aan lagu soo soo gudbin xeerkeedana la hakiyo sii deynta miisaaniyadeeda ilaa inta Golaha loo soo gudbinayo.
2. In miisaaniyadda laga saaro hey,adaha sharciyadooda ama muddo xileedkoodu dhamaaday sida Gudidda diiwaangaelinta ururada siyaasadda iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.
3. In laga bilaabo odooroska miisaaniyadda 2015 la goboleeyo miisaaniyadda dawladda dhexe.

4. in qaybta loogu talo galay mashaariicda horumarinta 2% gobolada bari iyaga oo mashaariicysan ka muuqaato misaaniyadda qaranka laga bilaabo 2015.
5. In lacagta loogu talo galay horumarinta wadooyinka la mashruuceeyo laguna muujiyo jaantus muujinayo lacagta wadooyinka kala duwan looga qoondeeyey.
6. Inuu Golaha uu hor yimaado Wasiirka Wasaaradda Maaliydu si sharaxaad dheeraad uu Golaha uga siiyo baahida keentay abuurista Khasnadda Guud ee Qaranka uguna iftiimiyo madax xigayaasha khasnadda Guud ee Qaranka.
7. Inuu Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranku Golaha Wakiilada hor yimado si uu sharaxaad dheeraad ah uga siiyo dakhliga deeqa caalamiga (UK, Denmark) iyo mashaariicda laga maalgelinayo sanad miisaaniyadeedka 2014 taas oo dhan \$ 13,500,000,= (saddex iyo toban milyan shan boqol kun dollar keliya).
8. In la ansixiyo siyaasadda misaaniyadda qaranka iyo odoroska miisaaniyadda qaranka ee 2014 oo dhan Somaliland Shillings 1.267.033.716.000,= (hal triliyan laba boqol lix iyo todoba bilyan, saddex iyo soddon milyan iyo todoba boqol lix iyo toban kun Somaliland Shilin).

Talooyin. Wuxuu Goluhu sidoo kale Miisaaniyada ku ansixiyay talooyinkan soo socda.

1. in siyaasadda miisaaniyadda qaranka ee 2015 mudnaan la siiyo wasaadaha wax soo saarka sida xoolaha, beeraha , kalluumeysiga iyo deegaanka lana kordhiyo miisaaniyadooda.
2. iyada oo la eegayo heerka sicir bararka ee ka jira Somaliland in loo kordhiyo ciidamada qaranka iyo shaqaalaha 40% musharkooda.
3. In dib u eegis lagu sameeyo miisaaniyadda wasaaradaha Maaliyadda, Madaxtooyada, wasaaradda warfaafinta, TV ga Qaranka, Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada iyo Khasnadda Guud ee Qaranka.
4. In dhamaan hey'adaha madax banaan ay mid kasta muujiso waxay ku soo kordhiso misaaniyadda qaranka si ay muuqaato inay qarankan wax tar u leedahay oo aanay noqon misaaniyadahoodu dhakhli iyo kharaj isku sar go'an oo keliya.



Sidaa darded, Wuxuu Goluhu 13/10/2013 Cod aqlabiyad ah ku ansixiyay Miisaaniyadii Qaranka ee 2014ka oo ay ku lifaaqanyihiin Go'aamadan aan kor ku soo xusnay iyo Talooyin

6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey:-



No	Masuulka	Xilka
1.	Md, Cali Maxamed Warancade	W. Wasaarada Arrimaha Gudaha
2.	Md. Xirsi X. Cali Xasan	W. Wasaarada Madaxtooyada
3.	Md. Axmed X. Cali Cadami	W. Wasaarada Gaashaandhiga
4.	Md. Xuseen Axmed Caydiid	W. Wasaarada Cadaaladda
5.	Md. C/casiis Maxamed Samaale	W. Wasaarada Maaliyada



7. Xeerarka Gudiyadu Hayaan

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
1.	Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada
	<ul style="list-style-type: none"> • Xeerka Midaynta Cashuuraha • Xeerka Caymiska Qaranka • Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency • Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka
2.	Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka
	<ul style="list-style-type: none"> • Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Cigaabta guud. • Xeerka Maxaabiista • Xeerka Gudidda Aasaaska Komishanka Dib u-habeynta shuruucda
3.	Guddiga Joogtada iyo Anshaxa
4.	Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta
	<ul style="list-style-type: none"> • Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose • Xeerka Saxaafada • Xeerka Ciyaaraha • Xeerka Hay'adda HIV/AIDSka.
5.	Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud
6.	Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah
	<ul style="list-style-type: none"> • Xeerka Duulista Madaniga ah
7.	Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta
	<ul style="list-style-type: none"> • Xeerka shidaalka (patrolium Act) • Xeerka Macdanta (Miniral Act)s
8.	Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa

8. Waxqabadka Guddiyada Golaha

Gudidda Joogtada iyo anshaxa.

Guddigu iyadoo ka wakiila Fasaxyada Golaha waxay intii lagu jirey, Gudidda Joogtadaiyo Anshaxu ma yeelan Wax fadhi ah madaama Shir-gudoonku Gudiyada Golaha ku sameeyay isku shaandheyn la isku badalay Mudanayaashii Gudiyada Golaha Dhamaantood, waxa kaliya oo Gudidda Cusub ee Joogtada iyo Anshaxu ay yeesheen fadhigii ay ku dooranayeen Gudoomiyaha iyo Xoghayaha (Gudoomiye ku-xigeen)ka Cusub ee Gudiddu yeelanayso, sidaa darteed wax fadhi kale iyo

kulamo ay cid kale la kulmeen oo ay yeesheen muu jirin intii lagu jirey fasax Kal-fadhiga 22^{aad} ee Golaha Wakiilad.

Intii lagu jirey kal-fadhigii 22^{aad} waxay Gudidda Joogtadu waxay Ka soo talo-bixisay

- **Md. Aadan Axmed Warsame** Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi baadhista iyo Technologyga
- **Md. Maxamed Muuse Abees** Wasiiru dawlaha Wasaarada Madaxtooyada.

Gudidda dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsigu iyadoo Gudaneysa Waajibaadkeeda Sharci ee Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha ku xusan, Waxay Warbixin iyo Talo-soojeedin ka Soo siisay Golaha Wakiilada Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2014ka oo Golaha Markii loo soo gudbiyay lagu wareejiyay si ay Waajibaadkeeda sharci uga soo gudato.

Ka dib, Markii ay Kulan la yeelatay 01/10/2013 Wasiirka Maaliyada *Md. C/casiis Maxamed Samaale* iyo Sharaakiisha Wasaaradaas si ay Miisaaniyada Wax uga weydiiso, sidoo kale waxay 03/10/2013 iyo 05/10/2013 kulamo sidaas oo kale ah oo Miisaaniyada 2014ka wax uga weydiiso la kala yeelatay Gudoomiyaha Baanka Dhexe *Md. Cabdi Dirir* iyo Maareeyaha Dekada Berbara *Md. Cali Xoor-xoor*.

Sidoo kale waxay Gudidda Dhaqaaluhu waxay Ka soo talo-bixisay

- **Md. Maxamed Jaamac Abgaal** Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta
- **Md. Bashiir Cabdi Xariir** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Ganacsiga iyo Maalgashiga

Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga.

Gudiddu Waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan, Wasiir ku-xigeenada iyo Wasiiru dawlayaashan soo socda:-

- **Md. Xuseen Axmed Cabdulle** Wasiirka Biyaha.
- **Md. Shugri Xaaji Ismaacill Baandare** Wasiirka Deegaanka.
- **Md. Cali Jaamac Faarax** Wasiirka Kaluumeysiga
- **Md. Aadan Ibraahim Maxamed** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Beeraha.
- **Dr. C/raxmaan Jaamac Cabdulle** Wasiiru Dawlaha Wasaarada Xanaanada Xoolaha

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)** Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo wacyigalinta.
- **Md. Axmed Cabdi Kaahin** Wasiirka Wasaarada Dib u-dejinta.
- **Md. C/waaxid C/qaadir C/raxmaan** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Warfaafinta iyo wacyigalinta.
- **Md. Shukri Xariir Ismaaciil** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Gudiddu waxay kulan la yeelatey Wasiirka Madaxtooyada **Md. Xirsi X. Cali Xasan**, kulankaas oo Gudiddu wax kaga weydiinaysay Xeerka Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka oo Xukuumadu u soo gudbisay Golaha, waxayna wax ka weydiyeen baahida Xeerka ee Xiligan iyo ujeedadiisa.

Gudiddu waxay Golaha u soo Gubisey Xeerka Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka oo Xukuumadu soo gudbisey Markii dambena Goluhu ansixiyay.

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

Gudiddu waxay qabatey Public Hearing ku saabsan caqabadihii laga kulmay Diiwaangalintii Codbixiyayaasha, kulan gudiddu u sameysay dadweynaha waxaa ka caawiyay Hay'adda IRI, kulankaas oo ka dhacey Hotel Maansoor waxaana ka soo qeybgalay Xisbiyada Qaranka, Gudidda Doorashooyinka, Ururada Arrimaha Bulshada, Madax-dhaqameed iyo Qeybaha kala duwan ee Saxaafada.

Sidoo kale waxaa kulanka goob-joog ka ahaa hay'addaha deeq bixiyayaasha oo ka mid yihiin EUda, Progresso, IRI iyo DANIDA, waxaa kulanka lagu soo bandhigay caqabadihii ka hor yimi Diiwaangalintii Codbixiyayaasha oo dalka hore looga qabtey oo Markii dambe Golaha Wakiiladu laaley in Doorashooyin dambe lagu galo, iyadoo dood iyo ra'yi isweydaarsi laga yeeshay kulankaas.

Sidoo kale, Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. Cali Maxamed Warancade** Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga.
- **Md. Cabdi Daahir Camuud** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga.
- **Md. Cali Maxamed Ahmed (Cali Sandulle)** Wasiiru dawlaha Arrimaha Gobolada Barri

Gudidda Siyaasada Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka.

Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. Maxamed Biixi Yoonis** Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
- **Md. Xasan Daahir Dhimbiil** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Qorsheynta Qaranka

9. Aqoon korodhsi iyo tababaro.

27 Oct-07 Nov ayaa Shaqaalaha Baarlamaanka ee labada Gole (Guurtida iyo Wakiilada) waxay Hay'adda IRI tababar aqoon korodhsi ugu qabatey Hotel Maansoor, tababarkan oo ku saabsanaa Doorqa shaqaalaha Sharci dejinta, Doorqa Gudiyada ee hanaanka sharci-dejinta iyo kobcinta aqoonta wax soosaar ee Baarlamaanka Somaliland, aqoon korodhsigan oo ay bixinayeen Macalimiin ka tirsan Shaqaalaha Aqalka Congresska Dalka Mareykanka oo mudo aad u dheer ka soo shaqeynayay Golaha Sharci-dejinta ee Dalkaasi.



Aqoon korodhsigan oo Furitaankii iyo Soo xidhistiiba uu ka qeyb-galay Gudoomiye ku-xigeenka 2^{aad} ee Golaha Wakiilada Md. Dr, Cali Yuusuf Axmed, waxaa shaqaalaha labada Gole ee ka qeyb-qaatey tababarkan lagu siiyay Shahaadooyin iyo Buug hage oo ku qoranyihiin waxyaabihii ay 10 maalmood ee ay aqoon korodhsiga ku jireen ku qaateen, tababarkan oo ahaa mid inta badan la practice gareynayay wixii lagu dhiganayay ayaa ahaa mid Shaqaaluhu aqoon iyo khibrad badan ka korodhsadeen.



Aqoon korodhsigan oo Xidhitaankiisii uu soo Xidhay Dr. Cali Yuusuf Axmed Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada, sidoo kale ay ka soo qeybgalaneen Xidhitaankaas Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Mr. C/risaq Siciid Ayaanle, Mudanayaal ay ka mid yihiin Md. Maxamed Cali Xirsi iyo Md. Cumar Axmed Saleeban (sanweyne) iyo Madaxda Hay'adda IRI, wuxuu Gudoomiyuhu xidhitaankaas ugu mahadnaqay Hay'adda IRI iyo Shaqaalaha labada Gole, wuxuuna Shaqaalaha ku booriyay inay aqoontey 10 casho qaadanayeen ku dabaqaan Shaqada Golayaasha, sidoo kale wuxuu xusay doorka muhiimka ah ee Shaqaalaha baarlamaanka.

10. Strategy Plan Ka Golaha Wakiilada Oo La Sameeyay

Golaha Wakiiladu waxa uu ka shaqaynayay muddaba in uu dejiyo qorshihiisa hiigsiga sadexda sanno (3yrs) ee soo socda, oo iminka nuqulkiisii diyaar yahay Golahana loo qeybinayo, Ujeedada qorshahani waa 5 ujeedo oo kale ah:-

1. In kor loo qaado Awooda Hay'adeed ee Golaha Wakiilada
2. In la hagaajiyo Habraaca Sharci Dejinta ee Golaha
3. In la horumariyo awooda Golaha ee la xisaabtanka, dabagalka iyo la socodka wadashaqneed ee hawlaha hay'addaha dawlada
4. In la horumariyo awooda Golaha ee wakiilnimo Shacabka

5. In la dhiso iyo korna loo qaado Xidhiidhada

Qorshahan qabyo qoraalka ah waxa nuqulkii ugu horeeyay soo diyaariyay Shaqaalaha Golaha Wakiilada, Ka dibna, Guddoomiyuhu waxa uu magacaabay Guddi Gaar ah (Adhoc Committee) oo dib-u-eegis ku samaysa qabyo qoraalka bilawga isla markaana dhamaystirta.

Guddidu waxay ka koobnayd sagaal (9) xubnood; waxa Guddoominayay Guddoomiye Ku Xigeenka 2^{aad} ee Golaha Dr Cali Yusuf Ahmed, waxaanu ka koobnaa lix (6) xubnood oo ah mudanayaasha Golaha, la taliyaha Sharciga iyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Golaha Wakiilada bilawgii gudagalka Nuqulkan qabyo qoraalka ah waxaa loo qaybiyay xubin kasta oo ka mid ah guddida ku meel gaadhka ah. Sida aynu hore u soo xusnay, Guddidan Gaarka ahi waxa ay guddo galeen nidaamka dhamaystirka qorshahan waxaanay raaceen dhammaan tallaabooyinka habraaca dejinta Qorshaha Hiigsiga (Strategic Plan).

Bilawgiiba kulankii ugu horeeyay ee Guddida waxa Workshop loogu qabtay Hotelka Maansoor 23 September 2013ka ka dib workshopka waxaa lagu hindisay “Qorshaha Hiigsiga Golaha ee Cusub “new strategic plan” waxaa Muumulka Goluhu Kuan uu isugu yeedhay kala yeeshay Qorshahan Hiigsiga dhamaan Hay’adaha Golaha la shaqeeya ee kala UNDP, AWEPA iyo IRI.

Dib-u-eegis faahfaahsan iyo lafagur ayaa lagu sameeyay qorshahan taariikhdu markii ay ahayd October 31, 2013, November 2, 2013 iyo November 3, 2013 iyadoo hay’adda UNDP **Mss. Samrita** oo ahayd khabiirad dejinta Qorshayaasha (Strategic plans provisional) waxay kulamo la kala yeelatay Xoghayaha Guud, Gudidda Gaarka ah, Agaasimaye Waaxeedyada iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha waxayna aad u sii lafagureen wixii loo baahanyahay in lagu daro Qorshahan.

Gabagabadii, waxaa la qabtay kulan lagu ansixinayo (Validation Meeting) oo November 4 2013 ka dhacay Hoteelka Maansoor waxaana ansixiyay draftkan Xubno Mudanayaal ah iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada oo La taliyaha Sharciga Goluhuna kala Qayb-galay.

11. Golaha oo Fadhi Xidhan yeeshay kal-fadhigii 22^{aad}

Intii lagu jirey kal-fadhigii 22^{aad} bilowgiisiba sida ajendihii kal-fadhigaas ku xusnayd wuxuu uu yeeshay Goluhu saddex fadhi oo xidhan maalimihii Axadda, Isniinta iyo salaasada ee ku taariikheysnaa 25 ilaa 27 August 2013.

Fadhiga xidhan ee mudanayaasha dodo dhaadheer ka yeeshen

1. Xaalada Guud ee amni iyo nabadgelyo ee Jamhuuriyadda Somaliland.
 - Waxay u jeediyeen baaq nabad gelyo beelaha walaalaha ah ee shaqaaqadu ku dhex martay degmeda oog, waxay tacsii u direen dadkii ku geeriyooday, kuwii dhaawacmayna waxay eebbe uga baryeen inuu caafimaad degdeg ah siiyo.
 - Waxay kale oo ay shacbiga Somaliland ugu baaqeen inay ilaashadeen nabadgelyada, wada noolaashada iyo wadajirka geesna uga soo wada jeestaan cadawga Somaliland.
2. Arrimaha dhallinyarada, shaqo la,aanta iyo tahriibta.
 - Waxa goluhu ugu baaqay dhallinyarada Somaliland inay dalkooda hooyo aaminaan
 - Waxa Goluhu ugu baaqay xukuumadda , shirkadaha iyo ganacsatada waaweyna Inay sameeyaan mashaariic shaqo loogu abuurayo dhallinyarada
 - Waxa Goluhu u soo jeediyey xukuumadda iyo shacbiga si adag loola dhagaalamo shabakadaha dembiilayaasha ah eek u foogan ama ku hawlan tahriibinta dhallinyarada
 - Waxa Goluhu isla qaatay inay qayb muhiim ah ka noqdaan wacyi gelinta dhallinyarada ee tahriibta.
3. Maadaama sidaan ka war qabno khasaare badan oo naf iyo malaba lihi ka dhasho dooxyada xili roobaad kasta gaar ahaan dooxyada kuwa u dhaxeeya Hargeysa iyo Berebera, waxa goluhu ugu baaqay deeq bixiyayaasha iyo xukuumadda in loo qorsheeyo dhismo biirjyo (bridges).
4. Waxa Goluhu xukuumadda u soo jeediyey iyada oo fulinaysa ku dhaqanka dastuurka ay Golaha Wakiilada u soo gudbisno heshiyada ay gasho.
5. Isaga oo fulinaya wajibkiisa dastuuriga ah, waxa Goluhu soo jeediyey in la xoojiyo dab galka Xukuumada.
6. Maciishada iyo sicir bararka.
 - Iyada oo heerka shaqo la,aanta shacbiga Somaliland aad u sareeyo, sanadihii ugu dambeeyeyna macashiidu kor u kacaysay sicir barar joogta ahina jiray, waxa Goluhu baaqa u jeediyey xukuumadda JSL inay qaado talaabooyin lagu xakameynayo sicir bararka iyo ascaarta ama qiimaha badeecadaha

- Sidoo kalena waxay ganacsatada JSL u soo jeediyeen inay u naxariistaan shacbiga Somaliland ee danyarta ah ee maciishadu ku sii adkaaneyso.
7. Waxa kale oo mudanyaashu dood adag ka yeesheen Wanaajinta iyo tayeynta maamulka Golaha.
- Xoojinta Xil gudashada mudanyaasha iyo ilaalinta saacadaha shaqada
 - Dardar gelinta shaqada guddi hoosaayadda Golaha
 - Dhamaystirka shuruucda qabyada ah ee Golaha taal
8. Mudanyaasha Goluhu waxay u soo jeediyeen ciidaanmka amaanka iyo hay,adda dawladda inay dhawraan dhawrsanaanta iyo maamuuska dastuurku siiyey mudanyaasha baarlamaanka JSL .

Intaa ka dib wuxuu Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu u saaray Gudidi gaara ah oo isku soo ururisa waxyaabihii Fadhiyadan xidhan Mudanayaashu kaga hadleen Gudidaas oo ka koobneyd 11 mudane waxay yeesheen kulamo dhowra waxayna falaqeyn dheer ka dib soo jeediyeen warbixin ka kooban dhowr qodob oo koobsaneysa waxyaabihii ka soo baxay fadhiyadaas xidhnaa, waxayna kala ahaayeen Mudanayaasha loo saaray.

1. Abdiraxmaan Maxamed Talyanle
2. Ibrahi Axmed Haybe
3. Abdiraxmaan Jaamac Muuse
4. Ali Obsiiye Deria
5. Abdirahman Osman Alin
6. Axmed Abdi Kijandhe
7. Maxamed Cumer Jiir
8. Xaashi Xuseen Caabi
9. Baar Siciid Faarax
10. Maxamed Axmed Obsiye
11. Maxamed Xuseen Xaaji Ciise

12. Isku shaandheyntii Gudiyada Golaha.

Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu sida uu dhigayo Qodobada 18^{aad} ee Xeer-Hoosaadka Goluhu, wuxuu sameeyay isku shaandheyn Gudiyada Golaha dhamaantood iyadoo Dhamaan Xubnixii Mudanayaasha ee Gudiyada ku kala jirey la isku wada badalay, mudane kastana Gudidiisii hore laga badalay oo loo

badalay Gudi cusub, iyadoo Gudi kasta mudanayaasheedu iska soo dhex doorteen Gudoomiye iyo Xoghaye cusub.

Intaa ka dib 8da Gudi ee Goluhu ka koobanyahay waxay soo doorteen Gudi kastaaba Gudoomiye iyo Xoghaye (Gudoomiye ku-xigeen) waxayna u soo gudbiyeen Shirgudoonka Warqadihii Gudi kasta oo doorashadaa Saxiixeen Mudanayaashu iyo Minuteskii Shirka lagu doortey.

11. Kulan Dhexmaray Golaha Wakiilada iyo Hay'addaha la shaqeeya.

Kulanka oo ka dhacay golaha wakiilada waxaa ka soo qaygalay xubno matalayay golaha wakiilada oo uu hogaaminayay Xoghayaha Guud ee Golaha C/risaaq Siciid iyo la taliya sharciga ee golaha Mustafe Mohamed H.Dahir iyadoo dhinaca kalena ay ka socdeen wakiilo ka socday hayaddaha golaha wakiilada la shaqeeya golaha oo ay ugu waawayn yihiin AWEPA, UNDP iyo IRI.

Kulankan oo ku saabsanaa in la dardar galiyo xidhiidhka soo jireenka ah ee ka dhexeeyay hayaddahan caalamiga ah iyo golaha wakiilada.

Kulanka waxaa furay C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee golaha wakiilada oo aad ugu mahad naqay dhamaan hayaddaha kor ku xusan sida ay uga qayb qaateen horumarinta golaha haday noqon lahad dhismaha oo ay Hayadda AWEPA ku bixisay dhaqaale aad u badan daartaa quruxda badana noo hirgalisay waan ku amaanaynaa, hayadda IRI oo hadda nala wada kobcinta tayaynta xeerarka golaha iyadoo waliba nagu soo kordhisay qorshe cusub oo ay guddiyadda golaha iyo bulshada rayidka ahi ay kaga wada shaqaynayaan fikiro iyo talooyina isku waydaarsanayaan iyagoo unkaya xeerar wadanka ka maqan oo u baahan in la unko.

waxaa ka mida xeerarka ilaalinta Deegaanka, Waxaa kale oo Xoghayuhu si wayn ugu amaanay Hayadda UNDP taakulaynta iyo taageerada in la helo Qorshaha Golaha ee 5 sano ee soo socda oo hada ah nuqul qabyo STRATEGIC PLAN waxaa kale oo uu uga mahadnaqay UNDP oo muddo hal sano ah naga caawin doonta hirgalinta XAFIISYO UU GOLUHU KU YEESHO GOBOLADA, mayirada goboladuna waxay balanqaadeen inay bixnayaan dhulka laga dhisayo xafiisyadaa, xukuumaduna waxay bixinaysaa mushaharka 10 shaqaale ah oo loo qaadanayo xafiisyadaa gobolada.



Dhanka kale hayaddahani waxay golaha ku amaaneen wada shaqayntii wanaagsanayd iyo qorshan nuqulka ah ee shanta sano waxaanay dhamaantood si niyad sami ah u balanqaadeen in ay xoojin doonaan la shaqaynta golaha iyo kobcinta tayada xirfadeed ee shaqaalaha iyo mudanayaasha.

Waxaa kale oo isna ka waramay qorsha mustaqbal ee golaha wakiilada la taliyaha sharciga Mustafe Mohamed H.Dahir oo si hufan uga waramay in uu yahay nuqul walina aynu haysano fursad aynu ku wanaajin karno talooyin wax ku ool ahna ku dari karno talooyinkiinu uu u yahay draft Somaliland Strategic Plan fursad uu ku sii qurux badnaan karo sidaad la socotaana waxa goluhu u saaray gudi gaar ah taasi oo golaha u gudbin doonta si loo ansixiyo kalfadhiga fooda inagu soo haya December 2013ka. Ka dibna in la gali doono Qorshaha iyo Qaabaynta Qaabka loo fulinayo IMPLIMENTATION PLAN aanaynu ka wada shaqayn doono.

Intaa ka dib xoghayaha guud ee golaha iyo madaxa hayadda UNDP ee Baarlamaanka waxay kulan gaar ah la qaateen Guddoomiye ku xigeenka labaad ee golaha Dr Ali Yusuf ahna kusimaha guddoomiyaha golaha waxaanay ka wada hadleen Qorshaha Hiigsiga Golaha (strategic plan) iyo sidii ay uga wada shaqayn lahaayeen fulinta gaadhista himilooyinkaas taas oo si wanaagsan layskugu afgartay.

Gabagabadii waxa laysla qaatay:-

1. In laga dhigo kulamadan qaar joogto ah oo laqabto sadexdii biloodba mar
2. in lagu daro strategy-ga xidhiidhka labada gole ee wakiilada iyo guurtida
3. in la qaban doono Kulan wayn oo mudanayaasha Golaha iyo agaasime waaxeedyada Golaha wakiilada taasi oo la hor dhigi doono 40 xildhibaan si ay fikirado cusub ugu soo kordhiyaan.

12. Wufuudihii Dibada ee Dalka yimi.

Wafti xilldhibaano ka tirsan Baarlamaanka Dalka Kenya ayaa dalka yimi 05/11/2013, wafigaas oo ka ahaa mudanayaal ka tirsan Baarlamaanka keynya ay hogaamineysa **Mp. Ana Niyokabe** waxaa dalka ku soo dhoweeyay Mudanayaal ka tirsan Golaha Wakiilada waxayna Kulamo la yeeshen Madaxweynaha oo ku qabiley Madaxtooyada, Shir-gudoonka Golaha Wakiilada iyo Guurtida iyo Mudanayasha labada Gole.

10/12/2013 Waxa kale oo Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahir (Cirro)** uu Xafiiskiisa kulan kula yeeshay wafti ka socota Wasaarada Arrimaha Dibada ee Dalka Denmark.



Wafigan oo uu hogaaminayay **Md. Henrik jesperson** oo ah senior technical advisorka Wasaarada Arrimaha Dibada ee dalkaas, waxaa kaloo waftiga ka mid ahaa **Marwo lote mindedal** la taliye ka ah safaarada Denmark ee Nairobi Kenya iyo **Md. Soren skou Rasmusen** Madaxa hay'adda DANIDA ee Somaliland.

Waftigan oo Somaliland u yimi qiimeynta Mashaariicd ay dawlada Denmark Maalgaliso ee ka socda dalka iyagoo mudadii ay joogeen waftigan soo booqdeen Gobolada Jamhuuriyada Somaliland, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada oo waftigan si diiran u soo dhoweeyay wuxuu uga waramay Xaalada horumarka, Amniga, Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Somaliland, wuxuuna u sheegay in shacabka Somaliland si weyn uga mahadnaqayaan dawlada Denmarka kaalinta ay kaga jirto mashaariicda horumarineed ee Somaliland ka socda.

Ugu dambeyntii Madaxa waftigani wuxuu Gudoomiyaha uga waramay baaxada kaalmada Denmark siiso Somaliland iyo ka qeyb-qaadashada Diiwaangalinta Cod bixiyayaasha Somaliland ee dhowaan in la sameeyo la filayo.

13. Safaradii Dibada

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Jamhuuriyada Somaliland Mudane C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro) oo wehiliyo Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane C/risaaq Siciid ayaanle ayaa socdaal ku tagay Xarunta Dawlad Deegaanka Soomaalida ee Dalka Ethiopia, ka dib martiqaad ay ka heleen Baarlamaanka dalka Ethiopia oo ku marti qaaday kasoo qayb galka xuska maalinta qoomiyadaha dalkaasi Ethiopia.



Munaasibada Xuskan oo 08/12/2013 ka dhacday Magaalada Jig-jiga ee Xarunta kilidhka shanaad ee ismaamulka Somaalida itoobiya sidoo kale ka qaybgalay Madaxweynaha Somaliland oo Socdaalk Dhulka ah ku gaadhey Jig-jiga.



**C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 22^{aad}